

Zuhur Hassan Ahmed & Anwar Maxamed Diiriye

Afka, Afcelinta iyo Caafimaadka

“Waxa aan ahay turjubaan caafimaad, oo Illaahayna ha iga cafiyee, marka uu dhakhtarku wax badan oo hadal ah is daba dhigo, haddii aan fahmi waayo, sidii ay ila noqoto ayaan bukaanka ugu sheegaa. Afka Ingiriisiga waa aan khasbaday ee iskuul kama baran. Hadda iskuul wakhti uma hayo, horena uma soo dhigan, laakiin carruur ayaan ka biishaa meesha, oo danta ayaa igu khasabtay in aan turjubaan noqdo. Markii aan Illaahay ka cabsado, wax badan kama fahmo dhakhaatiirta, oo xitaa waxa aan marmar ku mergadaa dadka waaweyn ee Soomaalida ahi afka ay xanuunnadooda ku sheegaan, sidii aan u turjumi lahaa.....Allaa xaal og^{48!}”

- Afceliye, uu Anwar Maxamed Diiriye, kula kulmay rug caafimaad. Columbus, Ohio. Octoobar 2009.

1. Hordhac

Marka uu qof doonayo in uu tilmaamo waxa uu dareemayo, ereyadiisa kama uu marna dhaqankiisu. Marka uu qof xanuunsanaya, dhakhtarkiisu uu weyddiiyo, sida loo hayo, waxa uu qofku u sharxaa dhakhtarka sida uu dareemayo isaga oo ereyo ku tilmaama xubnaha jidhkiisa, sida loo hayo iyo wixii la mid ah. Hooyo iyo Aabbe aan afka shisheeye garanayn marka ay afceliyeyaal u noqdaan dad aan afka Soomaliga si fiican u aqoon ama aan dhaqan Soomaliga wax fiican ka garanayn, waxaa dhacada in inta badan qofkii bukaanka ahaa dawooyin khaldan la liqsiyo, cabsiiyo ama lagu mudo. Arrintaa oo inta badan ay sabab u tahay khalad faham xagga afka ah oo ka dhex dhasha bukaan-socodka, afceliyaha iyo dhakhtarka.

Tani waxa ay tusaale taban u tahay dallagga laga goostay qaran burburkii, qaxii iyo hantaa-wiliftii Soomaali ku dhacday laba tobnaadley horteed; qooralka af Soomaliga oo aan weli kobcin, kuna dhex ragaasay waayaha qalafsan ee bulshadiisa hareeyey iyo han la'aanta bulsho ee af-iyo-dhaqan ka faanka makaabsatay, taas oo weliba kala goysey duntii sooyaalka iyo ab laga soo gaarka ahayd ee isku haysey jiilashiisa.

Markii galbeedka loo qaxay, waxa ay noqotay in afafka bulshooyinka loo tagey wax laga barto, dhaqammadooda la fahmo, bulsha weyntana la dhex galo, taas

⁴⁸ Afceliye Soomaaliyeed, oo uu Anwar Maxamed Diiriye, kula kulmay rug caafimaad. Columbus, Ohio. Octoobar 2009.

oo aan loo wada sinnayn oo daleesha dhigtay waalidkii ama qaraabadii da' yarta soo hayaamisay ee degelka cusub ku dhex furtay, dabadeedna miciinka bidday da' yartoodii hiil iyo hooba, si ay noloshaa cusub sadkooda uga helaan. Qormadan waxa aannu kaga hadlaynaa cilladaha iyo caqabadaha xagga afka ee la xiriira caafimaadka iyo arrimaha afcelinta.

Muddooyinkii u dhaxeeyey 1990 ilaa 2000, tirada dadka Maraykanka ku nool oo ku hadla afaf kale ee aan kan Ingiriisiga aheyni, waxa ay kor u kacday 5.2 milyan, oo halkii ay hore uga aheyd 31.8 milyan waxa ay noqotay 47.0 milyan. Isla markaana tirada dadka aan afka ingiriisiga si fiican ugu hadli karini waxa ay aheyd 14 milyan markii hore, dabadeedna waxa ay noqotay 21.4 milyan. Sannadkii 2010kii, waxa ay tiradaasi noqotay 25.2 milyan⁴⁹. Tiradaa korodhay waxa ay sii xoojisay welwelkii iyo baahidii awalba hore loogu qabay dad xirfad sare u leh afcelinta iyo adeegga afcelintaba. Sharci ay dawladda dhexe ee Maraykanku soo saartay, kana soo baxay Kacdoonkii Xuquuqda Dadweynaha ee 1964kii, ayaa shardi kaga dhigay cid walba oo ay dawladda dhexe maal galisaa, in ay dadka ay u adeegaan ee aan afka Ingiriisiga ku hadalkiisa iyo fahamkiisaba aan aqoonta u lahayn afceliye loo qabto⁵⁰. Awood li'ida qofka aan afka Ingiriisiga ku hadli karin ama aan sida fiican u fahmi karini, aanu ugu sheegan karin waxa uu rabo iyo waxa uu dareemayo toona daryeel-bixiyaha caafimaadkiisu, waxa ay sababtaa in aanu bukaanku si waafi ah u heli karin daryeelkiisa caafimaad ee uu u baahan yahay goor iyo ayaanba, waxaana yaraada fursadda iyo kanshaha uu bukaanku u heli karo xiriirka tooska ah ee dhakhtarkiisa uu la yeelan karo, iyada oo aan loo kala afcelin. Waxa intaa sii dheer, haddii qofka bukaanka ah iyo dhakhtarkiisu ayan isku af ku hadli karin, waxaa ka dhex dhici kara gefaf badan, sida in qofka baaritaankiisa caafimaad iyo la socodka daryeelkiisaba ay khalkhal iyo jahawareer galaan, haddii sida uu dareemayo ee uu sheeganayo ee saxda ah aan loogu afcelin, dabadeedna is-maan-dhaafka ka dhex dhasha dhakhtarka iyo afceliyuhu ay sababto cawaaqib xumo keeni karta in bukaanka dawo khalad ah loo qoro ama talooyin aan sax ahayn la siiyo⁵¹.

Qofka afceliya ah shaqadiisu waxa weeye in uu si saxan, oo hubsiiimo leh uu u gudbiyo waxa uu qofka bukaanka ah ee uu u afcelinayaa sheegto, oo uu gaarsiiyo daryeel-bixiyihiisa. Qofkaasi in uu si taxaddar leh u gudbiyo dareenka iyo ujeedka

49 U.S. Census Bureau 1990, 2000, 2010.

50 Limited English Proficiency LEP, Elizabeth Jacobs et al 295.

51 Anderson et al. p. 69.

farriimaha labada qof ee uu u kala afcelinayaayi waa muhiim, haddii la khaldana dhib iyo dhaawac hor leh sababa, haddii la saxana uu bukaanku ku najaxo, dhakhtarkuna uu si qumman u asiibo in uu daryeelka caafimaad ee uu bukaankiisu u baahan yahay uu si hufan u siiyo. Adeegyada ay bulshadu ugu baahida badan tahay dhanka afcelintu, waxa ay ahayd welina ay tahay tan ku saabsan lana xiriirta daryeelka caafimaadka. Qofka caafimaadkiisa wax ka qiima badani ma jiro, afcelinta oo khaldanta ama khalkhal dhaqan iyo mid afeed uu ragaadiyaana, waxa ay curyaaminaysaa xiriirka iyo is fahamka dhakhtarka iyo bukaankiisa, waxa ayna sababtaa caafimaadka qofka oo in la daryeelo iska daaye looga sii darro, waana halka ay Soomaalidu ka tiraahdo "xooluhuna urta ayay isku fahmaan, dadkuna hadalka⁵²."

Soomalida oo burburkii dalkooda ka dhacay ka dib u soo barakacday waddamada qurbaha ee uu galbeedku ugu badan yahay, Maraykankuna ka mid yahay, halkaa oo ay badidoodu degeen bilowgii sagaashameeyadii ilaa imminkana ay ku soo gurmaan, haba ugu badnaado gobolka Minnesota⁵³, oo ay bilowgii gaareen sannadkii 1993. Waxa ugu weyn ee qaxa dhaliyay waxa uu ahaa in ay dadku nabadgalyo iyo caafimaad helaan. Xabbaddii intii ka soo badbaadday waxa ay Minnesota gobolo ay ku jirto ka dhigteen hoy ay nolol maalmeedkoodana ka raacdeen. Waxa ay bulshadaa afka iyo dhaqanka qalaad soo dhex galay ay u baahdeen adeegyo badan oo uu ka mid yahay adeegga caafimaadka iyo xirfadley ka afcelisa. Haddaba markii in badan oo bulshada ka mid ah ay noqotay in ay dhakhtarkooda u tilmaamaan meesha laga hayo iyo sida loo hayo, suuragal waa ay u noqon weyday, in ay afkooda ku adeegtaan oo ay ku hagar baxaanna warkiiba daa, maxaa yeelay afka Ingiriisiga ku hadalkiisa iyo fahamkiisuba wuu ka adkaa. Waxa ay taasi ku kaliftay in ay u baahdaan dad waddanka ku dhashay, ku barbaaray, wax ku bartay ama afka Ingiriisiga hore u yiqiin oo u kala afceliya iyaga iyo daryeel-bixiyayaasha caafimaadka, waxaana soo ifbaxay dhibaatooyin la xiriira dhanka afka labada qof loogu kala afcelinayo, akhlaaqda afcelinta iyo isla fahamka arrimaha dhaqanka ee la xiriira afka iyo dareenka bukaanka.

52 Diiriye, p. 209.

53 Yusuf, p. 19.

2. Dulmar: Af-Soomaaliga

Afka Soomaaligu waa af curad ah, xikmad badan oo weliba leh ereyo badan, oo la xiriira xagga ruuxda, oogada iyo dhimirkaba. Waa af ay qormo la'aani ragaadisey muddo dheer. Haddii la hillaadiyo sooyaalkiisa far u raadineed, waxa dib loogu noqon karayaa oo laga soo billaabi karaa ilaa iyo qarnigii 17aad, oo ay soo baxeen culimo diimeed oo ku qanci waayey xarfihii carabiga, oo ay ka waayeen dhawaaqyo badan oo afka soomaaliga u gaar ah.

Rag badan oo si dul-ka-xaadis ah looga tilmaami karo Sheekh Yuusuf Alkowneyn, Xaaji Cali Sheekh Cabdiraxmaan Fiqi (Xaaji Cali Majeerteen), Cismaan Yuusuf Cali Keenaddiid, Sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Qaaddi, Shire Jaamac Axmed, Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal, Xuseen Sheekh Axmed Kaddare iyo kuwo kale oo badan, ayaa si aan gabbasho iyo hagar toona lahayn mar hore ugu baraarugey far la'aanta, oo har iyo habeen ugu soo jeedey, uguna riyoonayey, uguna xiddiga tiriyeey, bal in ay allifaan far uu afka Soomaaligu yeesho. Ugu dambeyntiina October 21keedii 1972kii ayaa xukuumaddii xilligaa ee ay askartu garwadeenka ka ahaydi, ay si aan hagrasho lahayn oo ay weliba geesinnimo iyo go'aan qaadasho ku dheehan tahay ugu baaqeen in maalinkaa wixii ka dambeeya afka Soomaaligu far leeyahay ayna tahay farta laatiinka.

Baahida farta la yeeshay loo qabey oo badnayd awgeed, suurtagal way noqon weydey in wax walba xilli kooban oo shan sano ah looga mira dhaliyo marka laga reebo ololihii la qaaday, aqoontii iskuullada ee lagu dhigay iyo in wax uun laga qabtay ururinta suugaantii tixda iyo tiraabtaba u lahayd. Dhanka erey-bixinta xirfadaha farsamada iyo saynisku ma badnayn, in kasta oo la dadaaley, kuwaas dib u dhacu ku dhacay ayeyna ka mid ahayd erey-bixinta caafifaadku, marka laga reebo buug ay qaybtii caafimaadka ee jaamicaddii ummadu dejisey oo aan xayndaabkeeda soo dhaafni. Waxa la oran karaa farta soomaaligu waa shan jir 1972-1977, oo sidii dagaalkii baas ee Soomaali galbeed loo galayba miisaaniyad iyo awood badan midna lama gelin, sababtuna waxa ay ahayd miisaaniyaddii dalka oo inteedii badnayd gashay ciidamada iyo agabkoodii maaddaama dagaal u joog la ahaa wixii ka dambeeyey 1978kii.

Waa arrintaas tan dhashay caqabadaha soo socda ee ay dad aan wareysi la yeellanay oo iskugu jira xirfadley caafimaad, bukaan socoto iyo afceliyayaalba ay nala wadaageen, waana tan sababtay in khatar badan oo xagga afka iyo dhaqanka caafimaadka la xiriira ay ilaa maanta ka jirto bulshada Soomaalida dhexdeeda, guud ahaan iyo daryeel-bixiyayaasha caafimaadka iyo afceliyayaasha labadaa makaab u dhexeeyaba.

3. Caqabadaha Afcelinta iyo Caafimaadka

Tilmaamaha uu qofka bukaanka ahi bixiyaa waxa ay u kala baxaan laba nooc ayaa uu yiri Dr. Cabdiraxmaan Maxamed⁵⁴, oo ah Dhakhtar ka hawl gala xarrun caafimaad oo gaar loo leeyahay, lana yiraahdo Axis Medical Center oo ku taal Minneapolis. Labadaa nooc waxa ay kala yihiin, tilmaan muuqaal leh oo uu qofku tilmaamo xubin ama meel oogadiisa ka mid ah, oo uu ku cabbiro xanuun ama nabar ka haya xubintaasi, sida bogga, beerka ama wadnaha oo kale. Tan kale waa xanuun ama nabar la xiriira ama ku saabsan maanka, maskaxda iyo dhimirka, oo uu qofka bukaanka ahi faalo ka bixiyo, sida isaga oo oranaya oo kale *"habeenkii oo dhan circa ayaa la iila kacaa oo ma seexo; sidaa ayaa warran la iigu gujinayaa; wax baa saa ii rifaanaya; marna kor baa la iila kacayaa marna hoos iwm."* Waxaa labadaa nooc dheer mid seddexaad oo ah xanuun aan isna la taaban karin ama (abstract pain), kaas oo uu Dr. Maxamed ku tilmaamay in uu noqon karo in uu qofku tilmaamayo xanuun ama nabar jirka xubin ka mid ah in uu ka hayo uu moodayo, laakiin ku lug leh oo la xiriira xagga maanka, maskaxda iyo dhimirka bukaanka.

Waxa uu tusaale u soo qaatay, haweeney Soomaaliyeed oo in muddo ah bugtey, oo in badan ka sheegan jirtey xagga beerka, oo mar kasta halka ay u maleynayso in uu beerku kaga jiro is qaban jirtey, aadna u matagi jirtey. Taas oo keentay in dhakhtar walba oo ay u tagtaa uu aad ugu mashquulo baaritaan xagga beerka, caloosha iyo boggoba ah. Dhakhtarku waxa uu intaa ku daray in ay aad ugu wareereen dhakhaatiirtii la tacaali jirtey waxa uu yahay xanuunka dhabta ah ee haweeneydan hayaa, iyaga oo afceliye kaashan jirey, ayna mar walba ku celceliso in laga hayo *"beerka, bogga iyo intaa uurka ah,"* iyada oo is haysa inta u dhaxaysa saaaableyda

⁵⁴ Wareysi ay Zuhur Xasan Axmed la yeelatay Cabdiraxmaan Diiriye Maxamed oo ah dhakhtar Soomaaliyeed oo ka hawlgala Minneapolis.

iyo miskaha. Waxaa ay la wadaagtay dhakhtar Maxamed ka dib markii ay isaga u timi, in dhakhaatiirtaas badan ee ay soo martay midwalba dawooyin badan u qoray, waxna aanay ka tarin.

Aakhirii waxa ay noqotay in ay haweeneydii qaadato talooyinkii iyo daweyntii Dr. Maxamed, oo ay sacabbadeeda biyihii ay u oommanayd kaga wabaxdey. Markii ay dhakhtarka uga warrantay sida loo hayo iyo muddada sidaa loogu degganaa, waxa uu la yeeshay wareysi ku saabsan xagga nafsadda, maanka, maskaxda iyo dhimirka. Waxaa dhakhtarkii u soo baxday in hooyadani ayan waxba ka qabin xubnaha ay ka cabanayso ee uu jiro xanuun xagga nafsadda ah, oo uu kufsi loo geystey markii Soomaaliya la isku gumaadayey uu xanuunkeedu salka ku hayo, oo daaran yahay, dabadeedna waxa uu u diray dhakhaatiirtii dhimirka ee ay shaqadoodu ahayd waxa haweeneyda hayaayi. Tanina waxa ay tusaale u tahay sida uu qofku daryeel sugan oo caafimaad u heli karo marka uu afkiisa ku adeeganayo, ayna dhakhaatiirta ugu fududaanayso in ay daweyn ku habboon bukaanka u helaan, *biyo sacabbadaadaa looga dhergaa*⁵⁵, ayay Soomaalidu hore u tiri.

Waxa aan halkaa ka ogaan karnaa in ay lagama maarmaan tahay in uu dhakhtarku ama qofka afceliyaha ahi uu aqoon fiican u leeyahay afka, dhaqanka iyo caadooyinka bulshada dabiibayo ama uu u afcelinayo, si fiican oo aan la yaab iyo iska weyneysiin ahayna uu u fahmi karo. "Haddii afceliyuhu aanu fahmi karin kala caado duwanaanshaha iyo af guriga dadka bukaanka ah iyo sida ay u yaqaanaan amaba ay ula dhaqmaan bukaanka iyo caafimaadkaba, ma buuxin karo mana haqabtiri karo baahida caafimaad ee uu bukaanku doonayo in uu dhakhtarka u sheegto. Sidaa oo kale, dhakhtarku hadii aanu la dhaqan iyo af ahayn qofka bukaanka ah, oo afceliyuhuna aanu si hufan uga dhaadhic karin dareenka bukaanka, marka dhakhtarku daryeel caafimaad oo hagaagsan ma siin karo ruuxaas."⁵⁶

Aqoonta dhaqanka waxaa iyaduna bar bar socota oo lagama maarmaan ah aqoonta afka. Afceliyuhu waa in uu aqoon sare u leeyahay af Soomaaliga, waana in uu fahmi karaa oo ixtiraami karaa weliba kala duwanaanshaha af guriyeedyada iyo heerarkooda. Tusaale ahaan, afceliyuhu haddii aanu garanayn ama aanu

55 Diiriye, p. 211.

56 Wareysi ay Zuhur Xasan Axmed la yeelatay Cabdiraxmaan Diiriye Maxamed oo ah dhakhtar Soomaaliyeed oo ka hawlgala Minneapolis.

fahmi karin xubnaha oogada jirka waxa af Soomaaliga lagu yiraahdo, ama aanu ixtiraami karin in erey uu si u yaqaan uu bukaanku si kale u yaqaan oo u sheego, markaa waxa dhacaysa laba amuurood oo kala ah; is afgaranwaa iyo is aaminaadda bukaanka iyo afceliyuhu isku qabaan oo lunta.

Bal u firso odaga Soomaaliyeed ee u sheegtay afceliye afka ingiriisiga si fiican u yaqaan oo Soomaali ah kuna koray Maraykanka in ay xiiqi ⁵⁷(Wheezing) hayso, oo dhakhtarkii ugu macneeyey in uu odagu madax xanuun daran qabo, kaas oo uu har iyo habeen ka seexan la'yahay, dabadeedna dawooyin khaldan oo madax xanuunka uun ku saabsan una roon loo qoray; halkii xiiq laga daweyn lahaa. Waxa iyana xusid mudan afceliyaha ay hooyada Soomaaliyeed u sheegatay in ay u malleynayso in uu waraabow⁵⁸ hayo, ee dhakhtarkii u sheegtay in hooyada waraabe qaniinay, oo markii dhakhtarkii weyddiiyey halka ay joogtey hooyadu goorta uu waraabuhu qaniinay tiri, "*bisinka e' weligayba waraabe iyo anigu isma aynaan arag*," laakiin afceliyihii kula murantay bukaankii in ay iyadu u sheegtay in waraabe qaniinay haddana ay is bedeshay. Waraabow waa cudur galmoodka lagu kala qaado oo deegaamo kala duwan oo ay dadka Soomaalidu degtana looga kala yaqaan ereyo kala duwan sida *bajo, xabbad iyo isfiilito*, afka shisheeye ee caafimaadkana waxa lagu yiraahdaa *sypilis*.

Waxaa iyana caqabadaha la xiriira caafimaadka iyo arrimaha afcelinta ka mid ah, is af dhaafka. Bukaanka ama afceliyuhu, waxa suurtagal ah in xubnaha jirka magacyada uu u yaqaan iyo meelaha uu u jeedaa ay ka duwanyihiin waxa uu dhakhtarka shisheeyaha ahi u yaqaan ama uu afceliyaha qudhiisu u yaqaan. Soomaalidu laabta, ama bogga waxa ay u taaqaan meelo badan oo uu wadnuhu ku jiro marmarka qaar. Markaa waxa in badan dhacda in qof yiraahdo wadnaha ama laabta ayaa la iga hayaa, oo in badan EKG iyo qalabyo kale oo wadne-baaris loogu talagalay lagu eeg-eego, ka dibna loo qoro Aspirin qofkaas, isaga oo cudur kale oo aan wadnahaba shaqo ku lahayni uu hayo, sida caabuq-caloolood oo kale. Aspirinkuna uu dhibaato hor leh u keeno, isaga oo laab dillaac daran ku kiciya kara bukaanka.

57 Diiriye, p. 222, 259.

58 Ibid, p.140, 171, 253, 257.

Sidoo kale, marka uu qofka Soomaliga ahi yiraahdo *qabow, biyo ama aaryo* ayaa i gashay, waxa uu u jeedaa inta badan caabuq kaga dhacay gidaarrada hunguri-cadka (bronchitis), marka haddii aanu afceliyuhu sidaa u fahmi karin ama uu isticmaalo afcelin toos ah oo aan xikmad ku dhisnayn, waa ay ku adkaanaysaa dhakhtarka shisheeyaha ah in uu cilladda si sahlan u fahmaayi. Tan macnaheedu waxa weeye, in haddii aanu afceliyuhu afafka uu ku kala afcelinayo, af-maldahyadooda, isticmaalkooda dhaafsan toos wax u sheegga iyo ereyadoodaba uusan si fiican u aqoon ama u fahmi karin, in aanu macne ka balaaran erey-eray ku turjumid aanu la iman karin, fahamsiinna karin dhakhtarka xikmadda dareenka bukaanka hor fadhiya.⁵⁹

Bal imminkana u firso gabadha Soomaaliyeed ee dhakhtarka London ku yaal tagtay, oo u sheegatay afceliyaha in laga hayo oo uu aad u xanuunayo moxoggu. Afceliyaha oo deegaan kale ka timi halka ay u taqaan moxoggu waa dhabarka qaybtiisa hoose, waxana ay dhakhtarkii u sheegtay in bukaanka dhabarka laga hayo. Haddii uu dhakhtarkii dhammaystay su'aalihii uu bukaanka weyddiinayey ee uu afceliyuhu u kala qaadayey, waxa uu ka codsaday bukaankii in ay dhabbacato, si uu dhabarka iyo halka laga hayo u eego. Afceliyihii waxa ay u sheegtay bukaankii in ay dhabacato, bukaankiina way yeeshay sidii la warsaday, oo sariirtii baaritaanka ayay ku dul dhabacatay. Dhakhtarkii cabbaar ayuu bukaankii dhabarka ka riixriixay isaga oo leh halkan ma ku xanuunaysaa, halkanna.... iwm.

Dhakhtarkii mar uu warqadihiisii ku mashquulay ayey bukaankii waxa ay weyddiisey afceliyihii sababta uu dhakhtarku dhabarka oo aan ahayn halka ay ka cabatay uu uga eegayo. Afceliyihii waxa ay ku tiri bukaankii walaal adiga ayaa ka sheegtay in dhabarka lagaa hayo. Dabadeedna bukaankii waxa ay ku tiri oo walaal moxogga in la iga hayo ayaan kuu sheegtaye ma dhabarkaad u taqaan? Afceliyihii iyada oo xanaaqsan ayey waxa ay ku tiri bukaankii, anigu aad ayaan afka u aqaan, moxogga waa dhabarka ee adigu ma meel kale ayaad u taqaan. Bukaankii waxa ay tiri walaal anigu waxa aan u aqaan gumaarka, marka dhakhtarku meel aanan ka jirranayn ayuu ku mashquulay ee in uu dhacadiidso i yiraahdaa bay ahayd. Afceliyihii halkii la rabey in ay ixtiraamto kala duwanaanshaha af guriyeedka oo ay weliba wax ka barato ayey bukaankii dagaal

⁵⁹ Wareysi ay Zuhur Xasan Axmed la yeelatay Cabdiraxmaan Diiriye Maxamed oo ah dhakhtar Soomaaliyeed oo ka hawlgala Minneapolis.

iyoo aflagaado la gashay, iyada oo leh, *wax aad afka ka taqaanidi ma jirtee, moxog waa dhabarka, malaha meel aan afka si fiican looga aqoon baad ka timid!* Moxog⁶⁰ deeggaamada qaar waxa looga yaqaan gumaarka, qaar kalana dhabarka qaybtiisa hoose.

Afceliye ka hawl gala Mayo Clinic, Rochester, Minnesota, ayaa uu dhakhtarkii u sheegay in uu doonayo in uu cad yar (biopsy⁶¹) iyo dheecaan uu ka soo qaado dulka (mirdhiska) sanku bukaanka. Dabadeedna waxa uu afceliyihii u sheegay bukaankii in maskaxdeeda qayb laga soo saarayo, oo la soo jarayo. Bukaankii waa ay ka cududaaratay wixii uu afceliyuhu u sheegay, waxana ay codsatay bal in ay ka soo fikirto. Iyada oo aad u naxsan ayey u tagtay dhakhtar⁶² Soomaaliyeed oo isla cusbitalka qayb kale oo ka tirsan ka hawl gala, waxana ay u sharraxday wixii uu afceliyuhu ku yiri. Dhakhtarkii Soomaaliyeed waxaa u caddaatay in is faham la'aani jirto, dabadeedna si uu u hubiyo waxa ay gabadhu u sheegtay waxa uu la hadlay dhakhtarkii ay aragtay. Dhakhtarkiina waxa uu u sheegay in uu doonayo in uu biopsy ku sameeyo. Dhakhtarkii Soomaaliyeed gabadhii bukaanka ahayd ayuu raacay, waxa uu ula tegey dhakhtarkeedii si fiicanna wuu ugu afceliyey oo ka dhaadhiciyey waxa laga rabaayi in uu yahay cad yar oo baaritaan lagu sameeyo. Sidii ayay ku oggolaatay gabadhii in baaritaankii la guda galo.

Cilladaha iyo caqabadaha xagga afka ee la xiriira caafimaadka iyo arrimaha afcelintu intan wey ka balaaran yihiin, waa ayna ka halis badan yihiin. Sida tusaalayaasha kor ku sheegan oo dhammaantood ku saabsan dhacdooyin dhex maray bukaan, afceliye iyo dhakhtarna, waxa ay na tusinaysaa dareenka taban ee xirfad la'aanta afcelinta iyo fahamka afalku ay ku yeeshen ama ku yeelan karaan bukaankeenna Soomaaliyeed. Waxa dhici karta ama dhacdayba in qalliimo aan loo baahnayn lagu sameeyey bukaan badan ama dawooyin khaldan loo qoray. Inta badanna khaladku waxa uu ka imanayaa xagga afceliyeennada aan xirfadda u lahayn afafka ay ku kala afcelinayaan, ee hawsha ka dhigtay ku shaqeyso uun. Waxa ay dhibaataada afcelintu keentay in jirrooyin badan, oo haddii hore loo ogaan lahaa si sahlan wax looga qaban lahaa, fahamkooda la seego, dabadeedna ay dad badani u dhinteen ama u naafoobeen.

⁶⁰ Diiriye, p. 229.

⁶¹ Ibid, p. 23.

⁶² Xog uu Anwar Maxamed Diiriye la wadaagey Dr. Cabdicaziiz A Jaamac (cardiologist), Mayo Clinic, Rochester, Minneapolis.

Maxamed Aadan⁶³ oo ahaa afceliye ilaa 1995kii ayaa isagu qirtay in markii uu xirfaddan bilabayey aanu aqoon fiican afka iyo dhaqanka Soomaalida toona u lahayn, markii horena uu u galay in uu lacag uun ka sameeyo. Gobalka Minnesota ee ay Soomaalida Mareykanka deggani u badan tahay, qofka afceliyaha ahi waxaa u sameeya \$25-\$100 saacaddii; isla markaana waa shaqo madax bannaan oo ay afceliyeennadu xilliyada ay rabaan uun ka shaqeystaan. Afceliyahani waxa uu intaa ku daray in ay taasi u tahay is difaacid dad badan oo ka xoogsada afceliyeennimada laakiin aan xirfad iyo aqoon badan u lahayn xirfaddar ay ka dhuunyadaan reerkooda iyo naftoodaba. *Eebow eexna ha nagu dilin, aqoon-darrana ha nagu cadaabin!*

4. Gunaanad

Wixii afkii hadalka ku caana maali jirey ee xogtiisa dabaylaha la iskugu gudbin jirey loogu baahday in mid far leh, oo la dhigaaliyo loogu tabar iyo tacab beelay, waxa ay ahayd in baylahda laga xafido, wax badan oo xikmaddiisa ka mid ahna la dhigaaliyo oo kayd dambe oo raandhiis loo aayo leh looga reebo bulshadiisa. Haddaba xilligii farta la hirgeliyey waxa laga ilduufay wax badan oo himillooyinkaa ka mid ahaa, waxaana dhacday in aan la ururin, la ereybixin, lana kayd in wax badan oo suugaantiisa ereyada caafimaadka ka mid ah. Taasi waxa ay na geyeysiisey in maanta lagu baraarugo ka dib markii dalal shisheeye loo qaxay oo degel lagu negaado ay dani nooga dhigtay.

Caqabadaha aan warqadda ku soo xusnay badidooda waxa looga gudbi karaa bulshada afkan leh oo si cilmi ah u barata, dhiganayaal loo sameeyo mihnadaha kala duwan si ay jilasha dambe ugu aayaan iyo in dhugmo loo lahaado in afcelintu ay tahay xirfad barasho iyo aqoon u baahan ee ayan ahayn “*anna way kan iyo qaataye qaado.*”

Anshaxu waxa uu biladaye u yahay hufnaanta afceliyaha shaqadiisa ka adag ee daacadda u ah. Sidaa darteed waxa muhiim ah in afceliye waliba xirfaddii uu doono ha ka shaqeeyee uu anshaxa iyo edaabta ka dhigo seeska shaqadiisa, oo uu si fiican u barto, kuna dhaqmo. Waxa iyana muhiim ah in dhaqanka “*ma aqaan,*” la barto oo aan laga xishoon. Kaasi waxa uu badbaadinayaa sharafka afceliyaha iyo baahida

⁶³ Afceliye Soomaaliyeed oo ay Zuhur Xasan Axmed ku wareysatay Minneapolis, Minnesota

bukaanka labadaba, waxna waa lagu bartaa oo waa aqoon mar walba afceliyaha u kordhaysa. Haddii uu afceliyuhu qabo cuqdad nafsi ah oo u diidda in uu yiraahdo wixii aanu aqoon ama fahmin, *ma aqaan ama ma garan*, taasi waxa ay caqabad ku noqonaysaa maskaxda iyo horumarka afceliyaha, waxa ayna dhaawacaysaa hufnaanta iyo anshaxa la doonayo in shaqada lagu qabto, bukaankana halis ayey qarka u saaraysaa, laga yaabo xitaa iy ay naftiisa halligto.

Afka iyo dhaqanku waa ay isku milan yihiin lamana kala saari karo, sidaa darteed qofka xirfadda caafimaadka in uu afceliye ka noqdo doonaya ama u soo banbaxaayi, waa in uu si fiican u dhuuxaa ereyada afka iyo xikmadaha dhaqan ee ay hillaaban yihiin. Ma dhici karto qof aan dhaqanka ereyada garanayni in uu libin ka soo hoyiyo xirfadda afcelinta ee caafimaadka iyo daryeelka bukaanka tppna. Si taas loo helana waa in dib la iskugu yabyabaa duntii jilasha ee go'day, si ay golayaasha u wadaagaan oo ay aqoon af iyo mid dhaqan labadaba iskugu gudbiyaan una kala dhaxlaan, si uu is fahamka dhexdooda ahi u biqlo oo u sahlanaado, goortaana ay goobaha caafimaadka iyo xirfadaha afcelinta si fudud iskugu fahmaan, aayaha dhow iyo kan dheer labadaba.

Raadraac

- Anderson, L. 2003. “Culturally Competent Healthcare Systems*1A Systematic Review.” *American Journal of Preventive Medicine*, 24.3 68-79. Print.
- Diiriye, Anwar Maxamed. 2006. *Literature of Somali Onomastics and Proverbs with Comparison of Foreign Sayings*. Minneapolis, MN. Gobaad Communications and Press. Print.
- Diiriye, Anwar Maxamed. 2011. *Medical Dictionary: English-Somali and Somali-English*. Minneapolis, MN. Gobaad Communications and Press. Print.
- Jaamac, Cabdicaziiz A. MD. Wareysi uu Anwar Maxamed Diiriye kula yeeshay Mayo Clinic, Rochester, Minnesota.
- Jacobs, Elizabeth, Alice Hm Chen, Leah S. Karliner, Niels Agger-Gupta, and Sunita Mutha. 2006. “The Need for More Research on Language Barriers in Health Care: A Proposed Research Agenda.” *The Milbank Quarterly* 84.1: 111-33. Print.

- Maxamed, Cabdiraxmaan Diiriye, MD. Wareysi ay Zuhuur Xasan Axmed kula yeelatay, Minneapolis, Minnesota.
- Maxamed Aadan, afceliye. Wareysi ay Zuhuur Xasan Axmed kula yeelatay Minneapolis, Minnesota.
- Yusuf, Ahmed Ismail. 2013. *Somalis in Minnesota*. St. Paul, MN: Minnesota Historical Society, Print.